

# Sample Letter for Parents/Caregivers

## Somali Version

Salaan ku socota Waalidka ama Mas'uulka ka Bacdi,

Iskuuladeenu waxay aaminsan yihii in waxbarashada ardayda ay ku xirantahay caafimaadkooda jir ahaan iyo maskax ahaanba. Si taas loo hubiyo, loona sameeyo jawi ixtiraam ku dhisan, waxaan ka codsanay hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers" ay ardaydeena siiyan Tababarka Ixtiraamka ee loo yaqaan "Respect Retreat."

Laga soo bilaabo sanadkii 1987, hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers" oo ah mid madax banaan, kana dhisan Minneapolis oo aan siyaasad ku shaqo lahayn ayaa dhalinyarada siinaysay barnaamijyo kobcinaya muhiimadda uu dhaqan wanaaggoo leeyahay ardayda iyo guud ahaan bulshada. Waxay hay'adaas ku dadaashaa in dhalinyaradu bartaan sidii ay ixtiraamaan naftooda iyo tan dadka kale marka ay iskuulka joogaan. Tani waxay u sahlaysaa ardayda in ay wadankooda iyo caalamkaba ay ka dhigaan mid aad u wanaagsan.

Tababarka Ixtiraamka ee loo yaqaan "Respect Retreat" ee hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers" waxay shaqaalaheedu iskuulada ka sameyndoonaan jawi wanaagsan iyagoo dhalinyarada baraya inay noqdaan kuwo naxariis leh oo ka hortaga cabsi gelinta lagu sameeyo ardayda kale "bullying."

Tababarkan waa mid fir-fircooni ku jirta oo la qabad doono \_\_\_\_\_ oo loo qaban doono ardayda fasalka \_\_\_\_\_ laguna qaban doono \_\_\_\_\_.

Si waxtarka ka soo baxa tababarkaas uu u noqdo mid waara, waxaan aaminsanahay in dhamaan qeybaha kala duwan ee bulshadu ka qeyb qaataan. Sidaa daraadeed waxaan waalidiinta ku dhiirigelinaynaa inay carruurtooda kala hadlaan tababarkaas iyagoo waydiinaya su'aalahan:

1. Tababaradee kuugu fiicnaa?
2. Horjoogayaashiinu "group leaders" see ahaayeen?
3. Maxaa ka mid ah falalka ixtiraam la'aanta ah ee iskuulkaaga ka jira ee aad saaxibadaa kala hadashay?
4. Maxaa ka mid ah falalka ixtiraam la'aanta ah ee iskuulkaaga ka jira?
5. Li sheeg wixii ka dhacay Dabshidka Kaamka "Campfire" habeenkii?
6. Is bedel ma ku dhacay sida aad u aragtid ardayda aad iskuulkaa isla dhigataan?
7. Li sheeg hal wax oo aad berrito iskuulkaaga ka sameyn doontid oo muujinaya ixtiraamka aad dadka kale kula dhaqantid?

Fadlan booqo websaydka [youthfrontiers.org/respect-retreat](https://youthfrontiers.org/respect-retreat) si aad u heshid akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan hay'adda caawisa dhalinyarada ee "Youth Frontiers," daawona viidiyow-ga ku saabsan tababarka waxgaradnimada ee "Respect Retreat."

Nabadgelyo,

Maamule ama Macalin